

Digniin ku saabsan cudurka jadeecada oo waalidiinta dhammaantood loogu talagalay

Cudurka jadeecada waa cudur aad u faafo oo lays qaadsiiyo. Cudurkeenaha wuxuu adeegsada hawada. Calaamadaha cudurka jadeecada ee ugu horeeyo waa qufac, qandho iyo indho gaduudsan. Jirka iyo wejiga cunugga jirran waxaa 3–4 maalmood kaddib, ka soo ixbaxaayo finan yaryar oo gaduudan (eeg masawirka).

arruurta aad u yaryar oo aan berri hore cudurka laga tallaalin, aad ayay ugu xannuusan karaan, waxaana dhici karto in ay u baahdaan in isbitaal lagu daryeelo (eeg hoos). Ubadkaaga waxaad ka badbaadi karta cudurka jadeecada, haddii aad ka faa'iidaysto barnaamijka tallaalka ee laga helo rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta (BVC). Markii cunugu u 18 bilood buuxsado ayaa tallaalka ugu horeeyo laga tallaala. Tallaalka ku xiga waxaa la tallaala markii uu sannad-dugsiyeedka 1:aad ama 2:aad dhiganaayo. Markaas kaddib ayuu cunugga gebi ahaan ka badbaadayaa cudur-keenaha.

Dalal aad u tiro badan ayaa cudurka jadeecada caadi ahaan laga hela. Xitaa dadka waawayn oo aan berri hore cudurka jadeecada ku dhicin ama laga tallaalin, wuu ku dhici kara. Haddii adiga iyo ubadkaaga aad ku talo jirtiin in socdaal aad ku tagtaan dal dibada ku yaallo, waxaa muhim ah in socdaalka kahor aad cudurka iska tallaalshaan.



Finan gaduudan



Indho gaduudan

Masawirro: © CDC

Haddii aad ka shakisan tahay in ubadkaaga uu cudurka jadeecada ku dhacay la xiriir [1177 Vårdguiden]

Maadaama cudurka aad laysku qaad-siiyo, waa in xiriir la yeelashada sida taabashada iwm layska ilaaliyo.

Booqashada isbitaalka/rugta daryeel-caafimaadeedka kahor la xiriir [1177 Vårdguiden]. Sida cunugga looga ilaaliyo in usan dad kale cudurka qaadsiiyin awgeed, waxaa muhim ah in cunugga xaalad-caafimaadkiisa lagu baaro qol gooni ah.

Talo-bixin awgeed wax [1177 Vårdguiden]:

☎ **Af-iswiidish 1177**

☎ **Af-soomaali 0771-1177 91**

